# Nidaamka Dacwadda Qodobka Nambar VI

## Waaxda Gaadiidka ee Nebraska

Qof kasta oo aaminsan in lagu takooray sinji, midab, ama asal qarameed by Wasaarada Gaadiidka ee Nebraska (NDOT) waxay xarayn kartaa cabasho adoo dhameystiraya oo soo gudbinaya Foomka Dacwada Title VI ee hay'adda. Cabashooyinka waa in la soo gudbiyaa 180 maalmood gudahood kaddib marka ay dhacdo dhacdadu. Cabashooyinka la helay 180 maalmood gudahood uma qalanto baaritaanka.

Dhammaan dacwadaha Qodobka Nambar VI iyo qawaaniinta la xariirtaba waxaa loo texgeliyaa rasmi ahaan—mana jiraan qaabab aan rasmi aheyn. Cabashooyinka waa inay ahaadaan qoraal uuna saxiixaa qofka dacwoonaaya.  Haddii cabashooyinka lagu soo gudbiyo wicitaan, macluumaadka waa la qorayaa waxaana loo bandhigayaa qofka cabanaya si uu u xaqiijiyo ama dib u hubin ugu sameeyo dabadeedna u saxiixo inta aan laguda gelin dacwada. Cabashooyinka waa in laga helaa magaca  qofka cabanaya, cinwaanka, nambarka taleefanka, waana in lagu caddeeyaa dhamman arrimaha iyo  xaaladaha heysooca lasoo gudbiyay. Eedeymuhu waa in ay ku saleysnaadadaan arrimo ku lug leh qabiil, midab, ama dalka qofku kasoo jeedo. Dacwadaha waxaa lagu soo diri karaa iyadoo heyadda lagala soo xariirayo macluumaadkeeda xariir ee soo socda:

**Nebraska Department of Transportation**
Attn: Transit Manager
1400 Hwy 2
Lincoln, NE 68502
(402) 479-4694
kari.ruse@nebraska.gov

Dacwadaha heybsooca ee Qodobka Nambar VI ee soo gaara (NDOT) waxaa loo gudbin doonaa dib u eegisna ku sameyn doona Qeybta Gaaadiidka ee Waaxda Wadooyinka ee Nebaska (Nebraska Department of Transportation). Waaxda Wadooyinka ee Nebraska waxay Maamulka Gaadiidka Dowladda Dhexe u sheegi doontaa in dacwadi soo gaartay. Dacwoodahana waxaa soo gaari doonta waraaq u sheegeysa in dacwadii baaritaan lagu sameynaayo iyo in kale. Waaxda Wadooyinka Nebraska waxay heysataa 30 maalmood oo ay dacwadda go'aan uga gaarto. Haddii warar dheeraad ah loo baahdo si xal looga gaaro arrinta dacwada,  heyaddu waxay la xariiri kartaa dacwoodaha si ay uga codsato faahfaahin dheeraad ah. Qofka dacwoonaya wuxuu heystaa 15 maalmood oo ka bilaabanta maalinta uu helo warqadda in uu ku soo gudbiyo faahfaahinta laga codsaday una soo gudbiyo dacwad baaraha.

Marka Dacwa Baaruhu dib u eegis ku sameeyo dacwadda, wuxuu soo saari doonaa laba warqadood midkood: warqadda xiritaanka ama warqad baritaanka. Warqadda xiritaanku waxay soo koobeysaa eedeymaha waxayna cadeeyneysaa in aysan jirin wax xad gudub ah oo lagu sameeyay Sharciga VI iyo in dacwadda la xiri doono. Warqadda baaritaanku waxay soo koobeysaa eedeymaha iyo wareysiyada la xariira dhacdada lasheegay waxayna faahfaahin doontaa in talaabo sharciyeed, tababar dheeri ah oo qofka shaaqalaha ah loo furo, ama talaabooyin kale ay dhici doonaan. Haddaba haddii dacwooduhu doorto inuu rafcaan (abiil) ka qaato go'aanka, wuxuu qofkaasi heystaa 30 maalmood oo ka bilaabmeysa maalinta uu warqadda xiritaanka ama baaritaanka helo inuu kusoo gudbisto rafcaankiisa.

Dukumeentigan wuxuu sharaxayaa Nidaamka Cabashada Takoorka ee Title VI ee Waaxda Gaadiidka ee Nebraska. Si aad u hesho nuqul dukumeentigan ku qoran Isbaanish, booqo bogga internetka ee hay'adda www.dot.nebraska.gov. Kaalmo dheeraad ah, la xiriir Waaxda Gaadiidka Nebraska telefoonka kor ku xusan. Turjubaan taleefan ayaa diyaar u ah inuu caawiyo dadka leh aqoon Ingiriisi xaddidan.

NEBRASKA Public Transit

NEBRASKA
Good Life. Great Journey.
DEPARTMENT OF TRANSPORTATION